





# Kahortaga Guud ee wasaqda

Barnaamijka ***Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego*** ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

waan **difaaci karnaa** marinadeena biyaha

ayadoo la qaadayao keliya dhawr talaabo.

**!** Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. ***Tilmaamahaan guud ee kahortaga wasaqda ee ganacsigaaga ayaa naga caawin doona nadiifinta marinadeena biyaha.***

## Gudaha dhismeyaasha

### XAFIISKA

- Yaree isticmaalka waraaqaha adoo samaynaaya koobiga iyo daabacaada labada bog ah ee shaqada caadiga ah.
- Baabi'i waraaqaha aan loo baahnayn adoo abuuraaya foomam elektarooniga ah ama yaraynaaya xajmigooda.
- Dib u isticmaal foomamka horay u dhacay ama waraaqaha la nacay si aad wax ugu qoroto.
- Isticmaal agab u baahan baakadayn kooban iyo qasacyo dib loo buuxin karo.
- Iibso waraaqda iyo agabka dib loo warshadeeyay markay suurtagal tahay.
- Ka saar magaca shirkadaada liiska iimeellada la nacay adoo joojinaaya liisaska aan la isticmaalin ama xayiisiinnada.
- Cusboonaysii liiska boostada ee shirkadaada si aad u joojiso labo jibaarka agabka iyo qarashaadka boostada.
- Yaree agabka baakadaha.
- Iibso keliya waxa aad u baahan tahay. Dib u dalbo marka aad gaarto heerka ugu yar.
- Ku boori macaamiisha inay yareeyaan wasaqda ayagoo dib u isticmaalaaya bacaha, qasacyada, iyo dib u isticmaalka agabka kale.

### DIB U WARSHADAYNTA QASHINKA ADKAHA AH

- Ismaamulka San Diego waxay leedahay xeerka dib u warshadaynta oo qasab ah. Haddii ganacsigaagu ku yaalo aag miyi ah, la xariir Laynka Dib u warshadaynta qashinka si aad u codsato talo bixinta dib u warshadaynta wasaqda ee BILAASHKA ah ee ganacsigaaga 877-R1Earth (877-713-2784).

*tilmaamo dheeraad ah >>>*

***Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.***

JANAAYO 2022





### DIB U WARSHADAYNTA QASHINKA ADKAHA AH

- Haddii ganacsigaagu ku yaalo magaallo, la xariir magalaadaada si laguu siiyo xogta dib u warshadaynta.
- Kormeer ku samee aagaga qashinka iyo dib u warshadaynta si aad uga fiiriso agabka dib loo warshadayn karo ee meel khaldan lagu xiday. Ku rid agabka qasacyada ku haboon.

## Banaanka

### QASHINKA IYO XASHKA

- Si joogto ah u xaaq qashinka, caleemaha, iyo waxyaabaha jajaban ee yaala meelaha baakinka iyo aagaga la maro.
- Dhig meelo ku haboon qasacyada qashinka oo leh daboolo si loo yareeyo qashinka iyo qashinnada "dabasha raacaaya".
- Ku dhaji boorarka "Lagu tuuri karo Qashin" gurigaaga.

### FALIDA DHULKA

- Adeegso sunta cayayaanka iyo daawada beeraha si waafaqsan tilmaamaha ku qoran oo ha isticmaalin kiimikooyinka kahor intaan roobku imaan.
- Ka saar qashinka, xashka, iyo waxyaabaha adag aagaga dhulka la falaayo.
- Wax ka badel afka tuubada si aad iskaga ilaaliso inaad biyaha ka badiso beeraha ayna dhaliyaan daad qulqula.
- Adeegso geedaha asalka ah ama kuwa iska difaaci kara abaarta. Geedahaan ayaa yareeya shaqada dayactirka iyo isticmaalka biyaha.
- Ilaali biyaha adoo yaraynaaya ama baabi'inaaya cawska.
- Ku boori dadka beera taagaga inay dib u isticmaalaanqashinka geedaha

### NABAAD GUURKA CIDA

- Ka saar ama dabool qaybaha agabka sida ciida, daawada beeraha, iyo agabka dhuulada geedaha lagu beero.
- Ka difaac taagaga daadku jiiro ee ka sareeya wax ka badan shan fiid jooga dhulka, oo ku fadhiya wax ka badan 250 fiid iskuweer, kana taag badan 3:1 (hoos ilaa kor) nabaad guurka ciida.

### DAADKA

- Ka fogee afka hore ee minjaroorka aaaga shaqada kuna leexi dhulka biyuhu ka dareerayaan sida taagaga.
- Si ku meel gaar ah u dabool meelaha ay maraan biyaha roobku kahor intaadan samayn shaqo la xariirta dareereyaal keeni kara daadasho, dilaac, ama daad.
- Si goos-goos ah u nadiifi dusha sare ee saqafka dhismahaaga.
- Haddii meesha gaari lagu dhaqo, meel ku shub dhammaan biyaba dhaqmada si aysan u gelin marinka biyaha roobka.
- Adeegso baafafka dhibcaha wasaqda ama qaabab kale oo lagu qabto wasaqda dareerta ee agabka yaala banaanka.

**Si aad u hesho xog dheeraad ah iyo fikrado kale, waydii wakaaladaha maxaliga ah, ka fiiri waraaqaha wararka ee ururka ganacsiga, iyo joornaallada.**

Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Difaaca harka biyaha ee Ismaamulka (WPO). ***Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada. Waad ku mahadsan tahay inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.***

**waad ku mahadsan tahay**

**inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.**

***Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.***